



Golaha Waxbarashadu wuxuu ansixiyey in shaqaalaha PPS qeyb ahaan fasax la galiyo ilaa dhammaadka bisha Luulyo

Dugsiyada Dadweynaha Portland waxa ay u guurayaan in ay shaqeeyaan tobaadkii afar maalmood ilaa dhammaadka bisha Luulyo, sababtoo ah iyada oo la saadaalinayo in dakhligu hoos u dhac ku imanayo sanad-dugsiyeedka soo socda. Dugsiyada degmada iyo hay'adaha kale ee qaata maalgalinta gobolka waxa ay rajeynayaa in ay waajahaan hoos dhac laxaad leh oo dhinaca dakhligii soo ururi jiray sababtoo ah raadka uu ku yeeshay dhaqaalaha xanuunkani COVID-19.

Qorshan qeyb ahaan fasaxa shaqaalaha la galinayo, kaasi oo ay ansixiyeen Golaha Waxbarashada kulankoodii qabsoomay maalintii Tallaadadii, waxa ay ujeedadiisu tahay sidii loo xakameyn lahaa si degdeg ah kharashka iyo waliba in la yareeyo raadka uu ku yeelanayo miisaaniyada ee dhinaca shaqaaleynta iyo maalmaha ardayda ay iskuulka dhigtaan sanad-dugsiyeedka 2020-21, haddaba iyada oo hoos u dhacani iminka raad aad u yar ku yeelanayo shaqaalaha intiisa badan dhaqaale ahaan. Shaqaalaha PPS ee qeyb ahaan fasaxa la galinayo taasi oo la yareeyn doono saacadahoodii shaqada qiyaas u dhiganta 20%, waxa ay xaq u leeyihiin in ay ka qeybqaataan barnaamijka La Wadaag Shaqada Oregon ([Work Share Oregon](#)), barnaamijkan oo ka kooban iskana kaashanayaan caymiska shaqo la'aanta gobolka iyo maalin galinta dawlada dhexe ee CARES. Haddaba marka ay shaqaaluhu ay ka qeybqaadanayaan barnaamijkan maaha mid ay mushaharkii ay qaadan jireen hoos u dhacayo sababtoo ah wuxuu magdhow u keenayaan waxa ka dhiman mushaharkii ay qaadan jireen.

Qorshaha qeyb ahaan fasaxa la galinayo shaqaalaha waxa taageeray ururada shaqaalaha ee degmada, oo ay ka mid yihiin Ururka Macallimiinta Portland, kaasi oo xubnaha ururku u codeeyeen inay ogol yihiin maalintii Tallaadadii. Waxa la rajeynayaa in qorshuhu macnihiisu noqdo mid ugu yaraan dheelitira \$10 malyuun oo dhinaca miisaaniyada ku iman lahaa in laga jaro sanad-dugsiyeedka 2020-21.

Dugsiyada degmada, oo ay ku jiraan barnaamijkii waxbarashada ardaydu guryaha ku qaadanayeen ee [PPS-HD](#), laga bilaabo todobaadkani waxa jadwalkiisu noqon doonaa maalmaha Isniinta ilaa Khamiista.

Intaasi waxaa kale oo dheer, Golaha Waxbarashadu waxa ay u codeeyeen in lagu kordhiyo saddex maalmood oo maalmaha jawiga cimiladu xumaado jadwalka waxbarashada iskuulada, kuwaasi oo kala ah bisha Juun 8,9 iyo 10, taasi oo sababi doonta in labo maalmood oo kaliya ay jadwalka waxbarashada sanad-dugsiyeedka lumaan.

[Addeega cuntada ardayda ee degmada](#), ee quraacda iyo qadadda laga qeybinayey 15 iskuul, iyagana jadwalkooda waxa laga dhigi doonaa in laga qeybiyo maalmaha Isniinta ilaa Khamiista. Maalinta Khamiista cuntada la qeybaniya waxaa ku jiri doonto in ay la bixiyo cuntadii Khamiista ilaa Axadda.

Iyada oo la raacayo wareegtii Guddoomiyaha Gobolka Kate Brown ay ku xirtay fasaladii iskuulada Oregon ay ardaydu wax ku baran jireen laga soo bilaabo bishii Maarso 16keedii. Guddoomiyaha Gobolku wuxuu kale oo uu amray bishii Abriil 8deedii, in la xiro dhammaan iskuulada inta ka dhiman sanad-dugsiyeedka waxbarashada 2019-20.